# Nadiifinta iyo Jeermis dilistaka dib kiis ah COVID-19 oo la xaqiijiyay



## Waxa ay tahay in la nadiifiyo:

- **Nadiifi oo jeermiska ka dil meelaha aadka loo taabto.** Diiradda saar musqulaha, meelaha la wadaago, iyo meelaha uu qofka qabo COVID-19 uu joogay muddo dheeraad ah. Xooga saar meelaha aadka loo taabto sida miisaska, kuraasta leh jildi adag, gacanka albaabada, daare-damiyaha nalka, gacanada, miisaska, musqulaha, iyo darka weelasha.
- **Xiro galoofyo la tuuri karo markii aad nadiifinayso jeermiskana ka dilayso sagxadaha.** Dhammaan galoofyada waa in la tuuraa ka dib nadiifinta/jeermis dilis kasta waana inaan loo isticmaalin ujeedooyin kale. Galoofyada waa in la beddelaa haddii ay dillacaan.
- **Nadiifi gacmaha isla markiiba** ka dib markii galoofyada la siibo oo la tuuro.

**Waa muhiim in la nadiifiyo oo jeermiska laga dilo meelaha banaan si looga fogaado fiditaan dheeraad ah ee koronafayras (COVID-19). Dukumintigaani wuxuu kaa caawin karaa inuu kugu hago meelaha ay tahay in jeermiska laga dilo, waxyaabaha**



## Sida loo Nadiifiyo Jeermiskana loo dilo:

**Haddii sagxadaha ay wasakh yihiin, nadiifi sagxadaha adigoo isticmaalaya oomo ama saabuun iyo biyo kahor intaan la dilin jeermiska.**

### SAGXADAHA ADAG

- Jeermis ka dilista, nadiifi sagxadaha adoo adeegsanaya kiimikada jeermis dilaha la barxay ee guriga lagu isticmaalo, milanka aalkolada leh ugu yaraan 70% o ah aalkolo, ama jeermis diliha guud ee ka diwaan gashan EPA ee lagu isticmaalo guryaha.
- Isticmaal kiimikada jeermis dilaha la barxay ee guriga lagu isticmaalo. Raac tilmaamaha soosaaraha ee loogu talagalay isticmaalka iyo marin hawo oo habboon.
- Hubso in sheygu uusan dhicin.
- Marna haku qasin jeermis dilaha guriga ammonia ama wax kale oo nadiifiye ah.

### SAGXADAHA JILICSAN (BIYO MAREENKA)

- )Ka saar wasakhda la arki karo haddii ay ku jirto oo ku nadiifi nadiifiyeyaasha ku habboon ee lagu tilmaamay in loo isticmaalo sagxadaha jilicsan.
- Hadday suuroggal tahay, dhaqida alaabta adoo isticmaalaya biyaha ugu diiran ee loo dajiyay alaabta iyo angajinta alaabta gabi ahaanba.
- Haddii aadan dhaqi karin alaabta, u isticmaal alaabooyinka EP ay ansixisay ayadoo la dhawrayo fayraska soo ifbaxaya ee ku shaqaynaya sagxadaha jilicsan.

## Alaabta ay tahay in La isticmaalo:

- Jeermis dilaha lagu isticmaalo guriga waxay si wax ku ool ah wax uga qaban doontaa COVID-19 markii si sax ah loo barxo.

### DIYAARI KIMIKADA JEERMISKA DISHA ADIGOO ISKU QASAYA:

- 5 qaado (1/3 koob) Jeermis dile halkii galaan oo biyo ah ama 4 qaado oo jeermis dile ah halkii rubuc oo biyo ah
- **HA u** isticmaalin jeermis dile dhacay
- Ku tirtir sagxada korkeeda una ogoloow sagxada inay hawada qalajiso
- Alaabada kale ee guryaha looga dilo jeermiska ee ka diiwaangashan EPA ayaa la filayaa inay wax ku ool u yihiin la dagaalanka COVID-19. Raac tilmaamaha soo saaraha ee dhammaan nadiifinta iyo jeermis dilista alaabada (tusaale ahaan, ku badinta, habka isticmaalka iyo waqtiga la xiriirida, iwm).

### MA RAADINAYSAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

**Booqo websaydka nadaafinta iyo jeermis dilista deegaanka ee CDC si aad u hesho macluumaad cusboonaysiin ah.**

Wisconsin Department of Health Services | Division of Public Health
DHSDPHBCD@wi.gov | 608-267-9003

P-02618SO (09/2020)